Janet T. Mills
Gudoomiyaha Gobalka

Jeanne M. Lambrew, Ph.D.
Wakiil

Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadwaynaha ee Maine
Xafiiska adeegyada MaineCare, Adeegyada Xubinka
11 State House Station
Augusta, Maine 04333-0011
Wicitaan lacag la'aan ah: (800) 977-6740; TTY: Wac 711
Fakis: (800) 314-8775

Ceymiska Baaritaanka, Daawaynta iyo Tallaalka COVID-19 ee Shaqsiyaadka aan Ceymiska Ku Jirin

Waxaa la cusbooneysiiyay Maajo 11, 2021

Tilmaamahan waxaa loo cusbooneysiiyay si loo muujiyo in tallaalka iyo daawaynta COVID-19 hadda laga dabarayo shaqsiyaadka aan ceymiska ku jirin laga bilaabo Maarso 11, 2021.

Waa maxay ceymiska baaritaanka, daawaynta iyo tallaalka COVID-19?

Nooca ceymiskan wuxuu ceymis u fidiyaa tallaalka COVID-19, baaritaanka iyo cudur ogaanshaha COVID-19, iyo daawaynta COVID-19 ee dadka aan ku jirin ceymisyada kale ee daryeelka caafimaadka. Tani waxaa ka mid ah baaritaanka qudhiisa iyo xafiis booqashada iyo qiimaynta la xiriirta. COVID-19 waxaa inta badan loogu wacaa fayraska korona.

Haddii aanan lahayn ceymiska caafimaadka, miyaa la iga dabarayaa kharashka baaritaaka, tallaalka, ama daawaynta COVID-19?

Haa, waxaad xaq u yeelan kartaa ceymiska tallaalka, baaritaanka, adeegyada baaritaanka la xiriira, iyo daawaynta COVID-19. Haddii aad xaq u yeelato, MaineCare ayaa bixin doonta lacagaha adeedyadan. Waxaad xaq ugu yeelan kartaa haddii:

- Aad tahay qof deegaan u ah Maine;
- Aad tahay muwaadin Mareykan, dhalad Mareykan, ama soo-galooti xaq leh; oo
- Aadan ku jirin wax ceymis ah;
    - Aadan xaq u lahayn ama aadan u diiwaangashanayn MaineCare ama Cub Care;
    - Aadan u diiwaangashanayn barnaamij kale oo daryeel caafimaad oo ay maalgeliso dawlada federaalka, oo ay ku jiraan: Medicare, TRICARE iyo Waaxda Arrimaha Halyeeyada, iyo ceymisyada shaqaalaha dawlada federaalka; oo
    - Aadan u diiwaangashanayn ceymiska caafimaadka kooxeed ama ceymisyada kale ee caafimaadka.

Dakhligaaga iyo hantidaada looma xisaabayo ceymiska baaritaanka, daawaynta iyo tallaalka COVID-19.

Waxaad u baahan doontaa inaad buuxiso codsi degdeg ah oo fudud si aad ceymis ugu hesho adeegyada baaritaanka, daawaynta, tallaalka iyo cudur ogaanshaha COVID-19. Xilliga codsi dirista, waxaa lagu fari doonaa inaad qirato inaadan lahayn ceymiska caafimaadka.

Maxay tahay sababta aan u codsanayo ceymiska baaritaanka, daawaynta iyo tallaalka COVID-19?

Haddii lagaa baaro, lagaa daaweeyo, ama lagaa tallaalo COVID-19 adiga oo aan heysanin ceymiskan ama ceymis kale, waxaa lagaa qaadi karaa lacagaha adeegyada. Haddii aad u maleyso inaad qabto COVID-19 oo bixiyahaaga uu kula oggolaado inaad is baarto, waxaa muhiim ah in sidaas la sameeyo si aad u hesho xogta aad u baahan tahay si aad gacan uga geysato inaad ka hortagto qoskaaga, saaxiibadaada, iyo dadka kale inay jirradaan.

Ma jirtaa maalin kama danbeys ah oo la codsanayo ceymiska baaritaanka, daawaynta iyo tallaalka COVID-19?

MaineCare waxay ku talisaa inaad codsato ceymiska ka hor inta aan lagu baarin misa aadan helin adeegyada baaritaanka la xiriira, tallaalka, ama daawaynta, haddii ay suurogal tahay, maadaama ay tani yareeneyso fursada in bixiyahaagu uu kugu soo dalaco biilasha adeegyadan. Sikastaba, maadaama ceymiskan loo heli karo oo kaliya aadeegyada la bixiyay inta lagu jiray Public Health Emergency (PHE) (Xaalada Gargaarka Degdegga ah ee Caafimaadka Fayadhowrka) ee federaalka, waxaad heysan doontaa muddo saddex bilood ah ka dib marki lagu tallaalo, lagu baaro, lagu siiyo adeegyada baaritaanka la xiriira, iyo/ama daawayn si aad u codsto ceymiskan gaarka. Haddii laguu oggalaado, lacag kuma bixin doontid baaritaanka iyo adeegyada la xiriira, tallaalka, iyo/ama daawaynta COVID-19 haddii aad qaadatay adeegyadan inta lagu jiray PHE. Codsiga waxaa la sii heli doonaa saddex bilood oo ka danbeysa dhamaadka PHE. Haddii ceymiskaaga la oggolado, waa inaad la xiriirto bixiyahaaga si aad ula socodsiiso si ay biilka adeegyadan ugu diraan MaineCare baddelki ay adiga kuu soo diri lahaayeen.

Adeegyo noocee ah ayaa lagu dabaraa ceymiska?

Haddii aad xaq u yeelato, waxaa la dabaraa baaritaanka cudur ogaanshaha COVID-19, iyo sidoo kale adeegyo la xiriira sida xafiis booqashada iyo qiimeynta. Wac adeeg bixiyahaaga ka hor inta aadan u bixin inaad la kulanto, maadaama laga yaabo inay kugu qiimeeyaan wacitaanka taleefonka ama muuqaal si ay u arkaan haddii aad baaritaan u baahan tahay iyo/ama booqashada shaqsiga uu soo xaadiro. La-tashiyadan caafimaad ee "isgaarsiinta loo adeegsado (telehealth)" ee wicitaanka ama muuqaalka sidoo kale waa la dabaraa. Uma baahan doontid inaad bixiso lacagaha baaritaanka ama adeegyada kale la xiriira ee ceymiska leh. Tallaalka COVID-19 sidoo kale waxaad ku heleysaa lacag la'aan, oo adeegyada aad qaadato si aad u daaweyso cudur ogaanshaha COVID-19 ayaa la dabari doonaa.

Sidee ayaan wax badan uga ogaan karaa tallaalka COVID-19?

Goobo tallaal ayaa laga diyaariyay agagaarka Maine, goob kastana waxay qabaneysaa ballamaheeda gaarka u ah. Waxaad booqan kartaa: https://www.maine.gov/covid19/vaccines si aad wax badan uga ogaato goobaha tallaalka ee kuu dhaw iyo sida ballan loo qabsado. Haddii aadan isticmaali karin bogga intarneetka ama aad u baahan tahay caawin dheeraad ah si aad ballan u qabsato, waxaad wici kartaa Khadka Taleefonka Tallaalka Bulshada ee Covid-19 ee Maine, kaas oo diyaar u ahaan doona inuu ka caawiyo dadka Maine inay helaan warbixinta ku saabsan rugaha caafimaadka tallaalka. Khadka Taleefonka Tallaalka Bulshada wuxuu sidoo kale taageero siin karaa dadka rer Maine ee u baahan kaalmada turjumaada, kaalmada gaadiidka, laga yaabo inay guriga ku xaniban yihiin, ama su'aalo kale ka qabo adeegyada deegaankooda. Si aad u hesho Khadka Taleefonka, wac 1-888-445-4111. Dadka dhagaha la' ama maqalka ku adag yahay waxay adeegsan karaan Khadka Taleefonka iyaga oo wacaya 711 oo ka codsanaya in lagu xiriiriyo 1-888-445-4111.

Haddii aadan heysan gaari ama qaab kale oo aad ku tagto kagana soo laabato ballantaada tallaalka, Waaxda ayaa ku siin karto gaadiid aad ku tagto ballamaha u qorsheysan Isniin ilaa iyo Jimce laga bilaabo 7:00am - 4:00pm. Waaxda waxay gacansaar la leedahay hay'ada ModivCare si gaadiid raac loo siiyo dadka u baahan in laga caawiyo inay tagaan ballamahooda tallaalka. Qabso ballantaada tallaalka **marka hore**. Ugu yaraan 48 saacadood ka hor ballantaada tallaalka, ka wac ModivCare 1-855-608-5172 si aad u qabsato gaadiid raac. Marka aad waceyso ModivCare, fadlan diyaar hakuu ahaadaan macluumaadkan soo socda:

- Taariikhda iyo waqtiga ballanta
- Magaca, cinwaanka, iyo taleefon lambarka xarunta aad ka qaadan rabto tallaalka, haddii aad hesyo
- Dukumiintigaaga aqoonsiga ModivCare, haddii aad leedahay

Ka waran haddii kolhore la iga tallaalay, la iga baaray, iyo/ama la iga daaweeyay COVID-19 oo biilka laigu soo dalacay?

Ceymiska baaritaanka COVID-19 ee dadka aan ceymiska ku jirin wuxuu dhaqangalayaa laga bilaabo Maarso 18, 2020. Waa inaad wali sii codsato si aad u ogaato inaad xaq u leedahay ceymis. Waxaad heystaa ilaa iyo saddex bilood laga soo bilaabo taariikhda lagu baaray si aad u codsato ceymis. Tusaale ahaan, haddii lagu baaray Abriil 30, 2020, waxaad heysataa ilaa iyo Luulyo 30. 2020 si aad codsi u dirsato oo aad u hesho ceymis. Fursada ceymiskan waxay sii jiri doontaa ilaa iyo maalinta u danbeysa ee Xaalada Gargaarka Degdegga ah ee Caafimaadka Fayadhowrka, balse waxaa sii socon doonta in laga sii shaqeeyo codsiyada ka dib dhamaadka muddada xaalada gargaarka degdegga ah.

Haddii aad codsato ceymiskan oo aad xaq u yeelato, waa inaad la xiriirto bixiyahaaga si ay biilka baaritaanka COVID-19 ugu dalacaan MaineCare oo aysan sii wadin inay kugu soo dalacaan biilka adeegyada baaritaanka iyo cudur ogaanshaha ee ay ku siiyaan. Haddii aad kolhoreba bixisay biilkaaga, waxaad u baahan doontaa inaad adeeg bixiyahaaga ka dalbato inuu lacagtaada kuu soo celiyo oo aad ka codsato taas baddelkeeda inay biilka ku dalacaan MaineCare si loogu magdhawo.

Ceymiska tallaalka iyo daawaynta COVID-19 waxay dhaqangaleysaa laga bilaabo Maarso 11, 2021, waana inuu adeeg bixiyahaaga kugu soo dalacin wax biil ah.

Kawaran haddii la i siiyo adeegyada kale ee daryeelka caafimaadka marka aan qaadanayo adeegyada la xiriira COVID-19?

Haddii aad hesho adeegyo aan ahayn kuwa la xiriira baaritaanka, daawaynta, ama tallaalka COVID-19, bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ayaa kugu soo dalici karo lacagaha adeegyadaas.

Sidee ayaan u codsadaa ceymiska baaritaanka, daawaynta iyo tallaalka COVID-19?

Codsashada ceymiska way fududahay! Waxaad u baahan doontaa inaad buuxiso codsiga halka bog ah ee laga heli karo bogga intarneetka ee Office for Family Independence's (OFI) (Xafiiska Madaxbanaanida Qoyska). Codsiga waxaa lagu buuxin karaa qaab elektaroonig ah ama inta la daabaco ayaa gacan lagu buuxin karaa. Codsiyada waa in dib loogu celiyo MaineCare iyada oo loogu dirayo iimayl, boosto ama fakis. Ka dalbo bixiyahaaga daryeelka caafimaadka inuu codsiga kuu daabaco haddii aadan intarnet heli

karin.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad codsato ceymiska MaineCare oo dhameystiran, waa inaad sidoo kale buuxiso bogga labaad ee codsiga si aad ugu darto warbixinta ku saabsan dakhligaaga iyo hantidaada.

Hay'ada Consumers for Affordable Health Care (CAHC) (Macaamiisha Daryeelka Caafimaadka La Awoodi Karo) ayaa laga wici karaa 1-800-965-7476 si ay kaaga jawaabaan su'aalahaaga oo ay kaaga caawiyaan hannaanka codsiga. Waxay sidoo kale kaa caawin karaan inaad fahamto noocyada ceymiska kala duwan ee aad helo karto.

Xageen ku celiyaa codsiga?

Waxaad ku diri kartaa codsigaaga mid ka mid ah qaababkan soo socda.

Booosto: Office for Family Independence
State of Maine – DHHS
114 Corn Shop Lane
Farmington, ME 04938

Iimayl: farmington.dhhs@maine.gov

Fakis: 1-207-778-8429

Sidee ayaan ku ogaan karaa haddii codsigeyga la aqbalay?

Haddii la arko inaad xaq u leedahay, waxaa laguu soo diri doonaa ogeysiis ah in lagu aqbalay oo lagaa diiwaangeliyay qeybta ceymiska Maine Rx. Maine Rx waa barnaamij kaalmo ka geysta daawo qorista oo dadka laga caawiyo kharashka daawooyinka dhakhtarka uu qoro, balse waxaan ka diiwangelineynaa shaqsiyaadka aan ceymiska ku jirin qeybtan si aan ceymis ugu fidino si degdega ah. Marka lagaa diiwaangeliyo barnaamijkan, waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad kaarkaaga Maine Rx ku hesho daawooyinka dhakhtarka uu qoro oo lacag dhimis leh.

Haddii aad buuxisay labada bog ee codsiga, ceymska MaineCare ayaa dib loo eegi doonaa waxaana laguu soo diri doonaa ogeysiis si laguugula socodsiiyo go'aanka. Haddii lagu qaabilo, ogeeysiiska ayaa kuu sheegi doona xilliga uu bilaabanayo ceymiskaaga MaineCare. Haddii laguu diido ceymiska MaineCare, ogeeysiiska ayaad ka ogaan doontaa sababta laguugu diiday.

Yaan wici karaa si aan su'aalo u weeydiiyo?

Haddi aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan codsashada ceymiska baaritaanka COVID-19, fadlan kala xiriir Office for Family Independence's (OFI) (Xafiiska Madaxbanaanida Qoyska) lambarka 1-855-797-4357. Adeegsadayaasha TTY waxay wacayaan 711.

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan adeegyada la dabarayo, fadlan ka wac Adeegyada Xubnaha ee MaineCare lambarka
1-800-977-6740. Adeegsadayaasha TTY waxay wacayaan 711.